



Waxaa Lagu Dhawaaqay Agaasime Sarre oo Cusub Aaga Dugsiga Sarre, Chris Frazier

Maayo 2023

Qoysaska iyo Shaqaalaha Qaaliga ah ee PPS,

Waxaan aad ugu faraxsanahay inaan ku dhawaaqo in Chris Frazier uu ku soo biirayo kooxda hoggaanka PPS isaga oo loo magacaabay inuu noqdo Agaasime Sarre Aaga Dugsiga Sarre. Christ waxaa xilka loo magacaabay uu qaban doonaa bilowga xilliga dayrtta 2023, isaga oo maamule ka soo noqday Dugsiga Sarre ee Franklin ilaa sanadkii 2018.

Chris waxaa loo magacaabay maamulaha Franklin ka dib markii uu ku soo shaqeeyey maamule-xigeenka dugsiga muddo dhan afar sanno. Bilowgii waqtigii uu joogay Franklin, Christ wuxuu kasbaday inuu noqdo hoggaamiye arrimaha bulshada aad ula socda waxtarna leh, xogogaal u noqoshada ardayda ilaa heer shaqsi iyo kor u qaadista soo dhaweynta, nabadjelyada, iyo ka shaqeeynta jawi degan oo waxbarasho kana turjumeysa kala duwanaanshaha iyo asalka bulshada Franklin. Waqtigii uu Maamulaha ka ahaa Franklin, Chris wuxuu kordhiyey heerka qallin-jabinta ardayda qiyaastii 85% ilaa 88%, oo ay ku jiraan 100% ardayda Madowga ahi sanad-dugsiyeedkii 2022.



Dadaaladii Chris kuma ekaan kaliya hoolasha Dugsiga Sarre ee Franklin inuu wax ka qabto waxbarasho loo siman yahay. Wuxuu sii waday inuu ka shaqeeyya isaga oo ka wakiil ah dhammaan ardayda Dugsiyada Degmada Dadweynaha Portland Dadaalada Xarunta Sinaanta Jinsiyada(Racial Equity Center Pipeline Initiative), wuxuu kale oo xubin ka noqday Isbaheysiga Hagida Dib-Eegista PPS, iyo inuu dhiso xidhiidho gudaha ah iyo saaxiibada dugsiyada degmada, oo ay ka mid yihiin barnaamijka SUN, Open School/Step Up, Multnomah County Health Clinic, Head Start, Teen Parent Program, I Am Academy, iyo Youth Empowerment Project, iyo waliba kuwo kale oo fara badan.

Ka hor intii aanu iman Dugsiga Franklin, Chris wuxuu sagaal sanno ka soo shaqeeyey Dugsiga Sarre ee De La Salle North Catholic, isaga oo ka soo qabtay xilka macallin dhiga dhaqaalaha ganacsiga, la taliye dhinaca waxbarashada ah, iyo Madaxa Ardayda, ka hor intii aan loo dalacsiin Maamule-xigeenka Waxbarashada iyo Diiwaangalinta. Waayo-aragnimadiisa sidoo kale waxaa ka mid ah inuu sagaal sanno ka soo ahaa kaaliyaha tababaraha ciyarta kubada gacanta(football) ee Dugsiga Sarre Grant.

Chris wuxuu shahaadadda koowaad kaga qaatay Jaamacada Willamette kuna qaatay Sayniska Ganacsiga Dhaqaalaha halka cilmiga bulshada ku kaabay, shahaadadiisii labaad wuxuu ka qaatay Jaamacada Concordia halka uu ku takhasusay Farshaxanka Waxbarashada, iyo iyada oo uu Jaamacada Gobolka Portland (PSU) ka qaatay shatiga maamulka.

Fadlan ila soo dhaweeya idinka uu u hambalyeynaya Chris doorkiisa cusub ee uu ka qaadanaya bulshada Dugsiyada Dadweynaha Portland.

Daacadnimo,

Dr. Jon Franco, Madaxa Dugsiyada